

SIDA AY TAHAY XAALADDA DADYOOWGA JIRKODA KU SIDA FAYRUUSKA-HIV EE KU NOOL DALKA ISWIIDAN 2013/2014

Dadyoow tiradooda ka badan 1000 qof oo jirkooda ku sida fayruuska-hiv kuna nool dalka Iswiidan, ayaa muddo 4 bilood ah la waydiin doonaa haddii ay suurtagal noqon karto, in ay ka qayb galaan cilmi-baaris ku saabsan sida ay tahay xaaladda dadyoowga jirkooda ku sida fayruuska-hiv ee ku nool dalka Iswiidan. Waxaa loo baahan yahay in la helo aqoon xiriir la leh xaaladda imminka jirta, ee ku saabsan noolasha iyo tayada kooxaha kala duwan, aqoontaas oo loo adeegsan doono haddii ay jirto baahi in wax laga beddelo daryeel-caafimaadeedka iyo habka qaabilaadda bulshada. Sidaas awgeed, ka qaybgelidaada waa arrin aad muhim u ah.

Sidee looga qaybgalaa?

Qoorta aad waaxda daryeelka infeekshannada booqato, waxaa lagu siinayaa qoraal-waydiimaha ku qoran su'aallo xiriir la leh caafimaadkaaga iyo haddii ay jiraan xaalado adigu dhib ku ah, sida shaqada, socdaallada, xiriirka aad daryeel-caafimaadeedka la leedahay ama xiriir. Buuxinta qoraal-waydiimaha waxay qiyaastii qaadanaysaa 20-40 daqiiqo.

Sida loola qabsiiyo xaaladaha imminka jiraan awgood, waxaa su'aallaha wadajir u soo diyaariyay ururrada iswiidishka ee taageera dadyoowga jirkooda ku sida fayruuska-hiv (HIV-Sverige, Noaks Ark, Brukarföreningen Stockholm). Su'aallaha qaarkood waxay noqon karaan kuwa soo noq-noqonaayo ama aan wanaagsanayn. Haseyeeshe, jawaabtooda waa muhim maxaayeelay waxaa lays barbardhigi doonaa kuwa dalka Iswiidan laga helo iyo kuwa dalal kale laga heli doono. Natijada cilmi-baarista oo kooban waxaa la soo bandhigi doonaa dhamaadka xilliga gu'ga 2014.

Aqoonsiga ka qaybgaleha cilmi-baarista marna lama shaacbixin doono, ka qaybgalida na waa ikhtiyaari. Marna suurtagal ma noqon doonto isku-xirka jawaabtaada iyo adiga. Sidaasoo kale, kuwa ku daryeela suurtagal marna uma noqon doonto in jawaabtaada ay akhristaan.

Ka qaybgelida markii aad doonto ayaa joojin kartaa. Haddii aad diido ka qaybgelida cilmi-baaris wax saamayn ah haba yaraate kuma yeelan doonto daryeel-caafimaadeedkaaga.

Yaa arrinta mas'uul ka ah?

Cilmi-baaristaan waxay ku salaysan tahay wada-shaqaynta Hay'adda kormeerida cudurrada lays qaadsiiyo ee dalka Iswiidan *Smittskyddsinstitutet*, Hay'adda *Karolinska Institutet*, Isbitaalka jaamacadda *Karolinska Universitetssjukhuset*, Venhälsan, Isbitaalka carruurta *Astrid Lindgren* ku yaallo magaalada Stockholm iyo waaxyada cudurrada infeekshanka keena ee magaalooyinka Helsingborg, Malmö, Karlskrona, Kalmar, Visby, Skövde, Göteborg, Örebro, Falun, Gävle, Umeå iyo Luleå. Madaxa cilmi-baarista waa Anna Mia Ekström, takhtarka cudurrada infeeksahanada keena borofosor ka aha Karolinska. Cilmi-baarista iyo qoraal-waydiimaha waxaa ansixiyay Guddiga dib-u-hubinta anshaxa guud *Regionala Etikprövningsnämnden* ee gobolka Stockholm.

Haddii su'aashaada ku saabsan tahay

... qoraal-waydiimaha, la xiriir qofka ku waydiiyay inaad cilmi-baarista ka qayb gasho
... cilmi-baarista, khadka taleefanka 0735 - 605 942 kula xiriir mas'uulka cilmi-baarista ama

e:mail u dir anna.mia.ekstrom@ki.se.

... guud ahaan fayruuska-hiv iyo/ama doonayso talo-bixinta qof aqoon u leh xaaladda dadyoowga jirkooda ku sida fayruuska-hiv, la xiriir

- Hiv-Sverige Riksförbundet loogu talagalay dadyoowga jirkooda ku sida fayruuska-hiv : Taleefan: 08-714 54 10, www.hiv-sverige.se
- Posithiva Gruppen. Taleefan: 0736-24 24 22, www.posithivagruppen.se
- Riksförbundet Noaks Ark, se www.noaksark.org la xiriir ururka degmada ama toos Noaks Taleefan 020-78 44 40

Oggolaanshada ka qaybgelida cilmi-baarista la magacbaxday sida ay tahay xaaladda dadyoowga jirkooda ku sida fayruuska-hiv ee ku nool dalka iswiidan 2013/2014

Ka qaybgalida cilmi-baarista waxaad ku muujin kartaa adigoo su'aallaha ka jawaaba. Waxaad sidaas ku muujinaysaa in ka qaybgelidaada ay ikhtiyaari tahay iyo in jawaabta gebi ahaan ay qarsoon tahay.